

Orientation to Ontario

GURIYAYNTA

DOOKHYADA GURYAHA

Guryo ku Meel gaar ah – Marka koowaad ee aad soo gasho Ontario, waxaad u baahan kartaa meel aad si ku meel gaar ah u joogto. Hudheellada iyo guryaha qiimaha jaban ee badelka u ah hudheellada. Si aad u hesho guryo ku meel gaar ah, ka raadi webseedyada dalxiiska ee deegaankaaga ama iibso buugga tasmada dalxiisaha kaasoo aad ka helayso liiska hudheellada.

Guryaha Iskaashatada Khayriga ah – Guryaha iskaashatada waxaa leh oo maamula xubnaha ama dadka deegaanka, laakiin dadka deegaanka ayaan lahayn mulkiyada guryahaan. Waa qasab inaad codsi u marto guryaha iskaashatada badanaana waa ka qiimo yar yihiin guryaha caadiga ah. Si aad u hesho og dheeraad ah, booqo onpha.on.ca ama findlink.at/NPHousing

Guryaha dawladu caawiso ama La kaabo – Guryaha dawladu kaabto, kirada waxaa lagu jaangooyaa dakhligaaga. Dad badan ayay sanado ku qaadataa inay sugaan guryaha noocan ah. Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo ontario.ca ama findlink.at/housing

Waxaad sidoo kale caawinaad wadiisan kartaa la taliyaahaaga dib u dejinta. Si aad u hesho wakaalada dejinta oo kuu dhow, booqo settlement.org

Xarumaha Hooyga ah – Xarumaha hooyga ah waxay hooy muddo gaaban ah siiyaan dadka aan guryaha haysan ama dhibaataadu ku dhacday. Si aad u hesho hooy kuu dhow, wac 211.

Guryaha Dadkaa Waayeelka ah – Waxaa jira noocyo badan oo guryo ah oo loogu

talagalay waayeelka reer Ontario. Ka wac Wasaarada Arrimaha Waayeelka lambarka **1-888-970-1999** ama booqo seniors.gov.on.ca ama findlink.at/seniorguid

Guryaha Ardayda Jaamacadah Jaamacadaha iyo kuleejyada ayaa guryo siiya ardayda ayagoo ka qaadaay qarash dheeri ah. Guryaha xarumaha jaamacada waxaa badanaa la socda cuntada. La xariir waaxda guryaha ee jaamacada ama kuleejka aad doonayso inaad dhigato si aad u hesho xog dheeraad ah. Guryaha ardayda ayay mararka qaar heli karaan dadka aan ardayda ahayn xiliyada xagaaga.

KIRAYSASHADA GURI KA MID AH DABAQ

Sharciga Kireysteyaasha Guryaha Xaafadaha (RTA) waxaa ku jira dhammaan xeerarka ay qasab tahay inay raacaan mulkiileyaasha guryaha iyo kireysteyaashuba. Ka akhri barta oonleenka ah oo ah ontario.ca ama findlink.at/RTAct

Waxaad sidoo kal wici kartaa Guddiga Mulkiileyaasha Guryaha iyo Kireysteyaasha oo aad ka wacayso **1-888-332-3234** ama booqo ltb.gov.on.ca

- Waxaa lagaa dalban karaa inaad saxiixdo heshiis kiro— oo ah heshiis sharci oo aad ku kireysanayso guriga waqti la cayimay, oo badanaa ah hal sano.
- Waxaa lagaa codsan karaa inaad bixiso lacagta kirada bisha ugu danbaysa kahor intaadan guurin.
- Waxaa lagaa codsan karaa inaad dhiibto lacagta damaanada ah (dhiboosid). Lacagtaan waa lagu soo celin doonaa


Funded by / Financé par



Immigration, Refugees and Citizenship Canada

Immigration, Réfugiés et Citoyenneté Canada

1-855-626-0002
<https://orientationontario.ca>



marka aad guurto, haddii aadan guri waxyeelayn.

- Waxaa caadiyan lagaa codsan doonaa inaad kirada dhiibto maalinta koowaad bil kasta.
- Adeegyadaada guriga, sida kulayliyaha iyo korontada, ayaa ku jiri kara lacagta kiradaada ama waxaa laga yaabaa inaad gaar u dhiibto.
- Si aad u hesho xog dheeraad ah oo ku saabsan guryaha, booqo settlement.org ama findlink.at/housinging

Helitaanka Guri Kiro ah - Ka fiiri xayisiinada gaarka ah wargeyska deegaankaaga adoo booqanaaya newspaperscanada.ca ama findlink.at/Newspapers

Ka raadi ciwaannada dhahaaya "Apartment Available (Guri banaan)" ama boorarka "For Rent (Guri kiro ah)" xaafadaada dhexdeeda. Booqo viewit.ca

IIBSASHADA GURI

- Si laguugu ogolaado deynta guriga waa qasab inaad leedahay sumcada daynta oo wanaagsan. Kala hadal bangigaaga sida aad ku samaysan karto taariikhda sumcada daynta.
- Marka aad codsato in guri lagaa gado, waa qasab in gurigu maro kormeerka xaalada guriga. Haddii kormeeraha guryaha oo ruqsad leh soo sheego in dayactir qasab yahay, waad joojin kartaa ama waxaad badeli kartaa qiimaha aad ku rabto.

Si aad u hesho xog dheeraad a, akhri buuga tusmada dadka wadanka ku cusub ee Iskaashatada Daynta iyo Guryaha ee Canada oo aad ka helayso cmhc.ca ama findlink.at/CMHCnc

MA OGTAHAY?

Inta badan dadka ayaa lacag daynsada si ay guri uga iibsadaan Ontario. Waxaad daynta guryaha ka codsan kartaa bangigaaga ama adoo u maraaya dalaalka daynta guryaha.

